



UNITED NATIONS

NATIONS UNIES

Office of the United Nations Resident & Humanitarian Coordinator for Somalia

Springette, Off Lower Kabete Road, P.O. Box 28832, 00200, Nairobi, Kenya

Tel. (254 20) 4255000; Fax (254 20) 4255101 Website: www.somalia-un.org

**Dhammbaalka Isku-duwaha hawlaha Bani'aadminnimada QM ee
Munasabadda **Maalinta QM, 24th OCTOBER 2008** ee loogu talo galay
dadweynaha Soomaaliyeed**

Maadama aan xusayno maanta, Maalinta QM, waxaa sharaf weyn ii ah inaan dhambaalkayga ku muujiyo dhibaatooyinka iyo caqabadaha dalka Soomaaliya xilligan ka taagan.

Xaaladda Soomaaliya ayaa ka sii daraysay maaalinba maalinta ka dambaysa intii lagu guda jiray sannadkan; arrintan dadka Soomaaliyeed waa ay ogyihiin, waaya-aragna waxay u noqdeen hadimooyinka xanuunka badan oo ay indhahooda ku arkayeen. Ilaa bishii January, waxaan goob-joog u ahayn kororsiimada tirada dadka soomaaliyeed oo qiyaastii boqolkiiba 77% inay u baahan yihiin gargaar bini'aadminimo. Taas waxaa macnaheedu yahay in mid ka mid ah labadii qof ee soomaali ah ay u baahan yihiin nooc ka mid ah gargaarka, iyadoo ay sababta ugu weyni tahay xilliga adag ee ay dadka tabaaleysani imminka ku sugan yihiin. Waxaana weli sii soconaya dhimashada iyo xad-gudubyada ka dhanka ah dadka rayidka ah, iyadoo nabadgalyadii ay noqotay xusuus sii lumaysa.

QM iyo hay'adaha kale ee Bani'aadminnimada ee la hawlgala, ayuu sannadkani u ahaa mid dhibaatooyin ay kala kulmeen Soomaaliya. Ilaa bilowgii sannadkan 2008, 29 qof oo u shaqeyn jiray hay'adaha samafalka ayaa lagu dilay, lix (6) ka mid ah waxay u shaqayn jireen QM, halka saddexda 23 kalena ay u shaqayn jireen hay'adaha aan dawliga ahayn(NGO), dhab ahaantiina waxay xuddun u ahaayeen hawl-maalmeedkeenna joogtada ah. Ha ahaato ama yeysan ahaanin xubnahaasi waxay ahaayeen kuwa si toos ah loo bartilmaameedsanayey, maxaa yeelay waxay sababsadeen hawlgalkooda dhinaca samafalka ah, tani waxay dareen xanuun iyo murugo leh u tahay QM, Beesha hawlgallada bani'aadminnimada iyo dhammaan shacbiga Soomaaliyeed guud ahaan. Waxaa kaloo shaqaalaha loo gaystaa xad-gudubyo ay ka mid yihiin; af-duub, caga-juglayn, cabsi-gelin, kuwaasoo caqabado hor leh ku abuuraya awooddii dhinaca hawlgallada gargaarka iyo adeegyada loogu talo galay dadweynaha Soomaaliyeed.

Nasiib-darro, kuwa ugu khatarta badan waa shaqaalaha muwaadiniinta Soomaaliyeed, kuwaasoo si adag ugu dadaalaya xaqiijinta hawlaha QM — iyo in sidii loogu talo galay gargaarka loogaarsiiyo dadweynaha tabaalaysan, labadaraadle, dhisidda dugsiyada iyo ceelasha biyaha, tababaridda shaqaalaha iyo taageridda hay'adaha inay habsami u socdaan. Waana kuwa khadka hore uga jira dadaalka lagu dar-dar gelinayo hirgelinta barnaamijyada horumarinta iyo hagaajinta mustaqbalka Soomaalida.

Inkastoo ay caqabadahaasi jiraan, haddana QM, waxaa ka go'an inay xaqiijiso hawlgallada ku wajahan nabadda iyo sidii ay ku hagaajin lahayd nolol wacan oo loo xaqiijiyo dadka rayidka ah ee Soomaaliyeed. Sidaas awgeed, waan joognaa waana idinla joogi donna. Waxaan joogtayn doonnaa hawlgallada aan wadno. Waan ognahay inay jiraan waxyaabo aan si habboon u qaban karno, sida; is-gaarsiin dheraad ah iyo xiriir wacan, wada tashiyo baaxad leh oo bulshada lala yeelanayo iyadoo dhammaan arrimaha kor ku xusan aan xarumo joogta ah oo dheeraad ah ay gudaha ku leeyihiin. Waxaanan taageeraynaa arrinmahan, annagoo qaddarin doonna taageeradiinna wax-ku-oolkaa ah.

Waxaan aqoonsanahay baaqyada dib-u-soo-cusboonaanaya ee sii kordhinaya xaaladda amaandarrida ah ee dalka ka jirta iyo waxqabad macquul ah oo ku wajahan sidii wax loogu qaban lahaa dadweynaha tabaalaysan ee xaaladda ba'an imminka ku sugan. Laakiin, waxaan ka mid nahay hay'adaha waddamada isku-dhafan ee hawlgalka wadaaga oo darsi ka qaatay sida ay wax u dhacayaan. Sidaas awgeed, waxaan ugu baaqaynaa dadweynaha Soomaaliyeed inay si wadajir ah noola shaqeeyaan, una noqdaan la-hawlgalayaal ka qayb qaata xal u helidda mashaakilkaas, si markaas fursad loo siiyo in hawlgalladaasi jawi nabadgalyo ugu fulaan, islamarkaana loo sii amba-qaado dadaalka hawl aad aad idinkuna ka qaybgashaan.

Maanta, halkii aan dhambaalakan idiinku soo gaarsiin lahayn qaab qoraal ah, waxaan door bidnay inaan si wadajir ah xuska maalinta QM ugu ula dabbaal-degno Soomaalida. Waxaana halkan nooga muuqda rajo wacan iyo ballan-qaad la xiriira in sannadkan dambe mustaqbal wacan la gaari doono.

Mark Bowden
Isku-duwaha Hawlaha Bani'aadiminimada QM ee Soomaaliya